



Bayaan ay soo saareen Qurbajoogta, Xildhibaanada federaalka iyo Isimada Dhulbahante

Jun 26 -2017

Shacabka deegaanka SSC, xildhibaanada dowlada federaalka iyo Isimada beesha Dhulbahante waxay taageerayaan talaabo kasta oo difaacaysa jiritaanka, madaxbanaanida iyo isu taliska shacabka SSC. Waxaa kele oo aanu taageeraynaa ilaalinta nabada iyo midnimada Somaliya. Hadaba anaga oo ka duulayna dareenka guud ee shacabka SSC dal iyo dibedba, oo meteleyna beelaha Dhulbanahte waxaanu cadaynaynaa una sheegaynaa ummada Soomaaliyeed iyo gaar ahaan beesha Isaaq qodobada hoos ku qoran:

1. In Dr.Cali Khaliif Galaydh iyo kooxda uu xushay aanay metelin shacabka Dhulbahante.
2. In uu ka weecday hadafkii iyo ujeedooyinkii loo aasaasay Khaatumo, isaga oo ku takri falay go'aamo masiiriya.
3. In waxkasta oo wadaxaajood ah oo khuseeya aayatiinka beelaha SSC ay Isimada beelahaasi bixiyaan ogolaansho maadaama ay yihiin hay`ada ugu saraysa.
4. In mas`uuliyiin laga soo dhex-xulay beelaha Dhulbahante iyo Isimada beeshu isugu iman doonaan shir wadatashi ah oo ka dhaca dalka gudihisa, halkaasna lagu cadayn doono rabitaanka shacabka SSC.
5. In kooxda qorbajoogta ah ee ku qadhaabta magaca KDO ay yihiin koox u adeegta Cali Khaliif oo taabacsan qadiyada Somaliland, sidaadaraadeed aanay metelin qurbajoogta Dhulbahante.

Baaqa waxaa soo wadasaaray Isimada, Xildhibaanada dowlada federaalka iyo Qurbajoogta Dhulbahante ee liiska hoos ku qoran:

1. 11 Isim oo dhulbahante	2. Xildhibaanada Dhulbahante dowlada Federaalka	3. Jaaliyada East Africa	4. Jaaliyada gobolka Banaadir
5. Jaaliyada: Ohio	6. Jaaliyada: Toronto	7. Jaaliyada: Seattle	8. Jaaliyada: Chicago
9. Jaaliyada: Belgium	10. Jaaliyada: Minnesota	11. Jaaliyada UAE	12. Jaaliyada: Ottawa
13. Jaaliyada: Alberta	14. Jaaliyada: California	15. Jaaliyada: Boston	16. Jaaliyada: Virginia
17. Jaaliyada: Denmark	18. Jaaliyada: Atlanta	19. Jaaliyada: London	20. Jaaliyada: Sweden
21. Jaaliyada: Germany	22. Jaaliyada: Norway	23. Jaaliyada: Switzerland	24. Jaaliyada: Bristol
25. Jaaliyada: Netherland	26. Jaaliyada: Birmingham	27. Jaaliyada: Brisbane	28. Jaaliyada: Melbourne

Wbt, Gudiga Qurbajoogta Dhulbahante.

